

IIB MA GALO

FAAFINTA

الجريدة



RASMIGA AH

الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad

Muqdisho, 18 Agoosto 1979 L. 2 R 8

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 Shilin lambar waliba RUKUNKA: Sanadkii waa Sh. 100  
Soomaaliya guduheeda — dibadeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto  
waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qoritaanku F. R.  
halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh — Rukunka iyo qoritaanku waxaa  
la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu  
bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lagagta

KOONNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHAHRCI  
M.W.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 44 ee 28/Luuliska  
yo 1979 Magacaabid Xubnaha Guddiga Xafiis-  
ka dhexe ee Aftida.

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 45 ee 1 Agoosto '79, dib u  
dhigid taariikhda Aftida Dastuurka.

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho.

## QAYBTA LABAAD

### X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L 44 ee 28 Luulyo 1979 Magacaabid Xubnaha Guddiga Xafiiska Dhexe ee Aftida

### MADAXWEYNAHA J. D. S.

MARKUU ARKAY: Warqada laad 2aad iyo 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Sharciyada lambar 1, 17 18, iyo 19 ee 1da Luulyo 1976;

MARKUU ARKAY: Qod. 11aad ee sharciga lambar 23, soona baxay 16ka Juun 1979, kuna saaksan Aftida Dastuurka;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la dhammeystiro dhismaha Hay'adaha Aftida, lana magacaabo xubnaha Guddiga Xafiiska Dhexe ee Aftida Dastuurka;

MARKUU TIXGELIYAY: talada Guddoomiyaha Guddiga Qaranka ee Aftida;

### WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo magacaabay xilka Guddiga Dhexe ee Aftida Dastuurka Xubnaha soo socda:

1. Jaalle Axmed Jaamac Cabdulle «Jingeli» Gudoomiye
2. » Axmed Cali Saalax Gud. ku xigeen
3. » Rashiid Sheekh Cabdullaahi Kaaliye
4. » Cabdullaahi Maxamed Maax Kaaliye
5. » Axmed Sheekh Jaamac Kaaliye
6. » Xasan Maxamed Caumar Xoghaye

### U QAYBSANAYAASHA TIRADA

1. Jaalle Cabdulqaadir Macow Cumar
2. » Iikar Baana Haddaad
3. » Axmed Maxamed Cali «Qoslaaye» iyo
4. » Maxamed Cabduraxiim Maxamed

Qod 2aad

Xubnaha kor ku xusan waxaa la dhaarinayaa waqti dib la-ga soo sheegi doono, hase yeeshee mar kastaa waa in ay ku sug-naadaan xarunta loogu tala galay Xafiiska Dhexe ee Aftida ugu dambeystii 8da subaxnimo ee 26ka Agoosto 1979.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madax-weynaha J. D. S.

Muqdisho, 28 Luulyo 1979

MADAXWEYNAHA JDS

(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

**XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 45 ee 1 Agoosto dib u dhigida Taariikhda Aftida ee Dastuurka**

**MADAXWEYNAHA  
J. D. S.**

**MARKUU ARKAY:** Warqadda laad, 2aad iyo 3aad ee Kaacaanka 21, 10. 1969;

**MARKUU ARKAY:** Sharciyada Lambar 1, 17, 18, iyo 19 ee 1dii Luulyo 1979

**MARKUU ARKAY:** Sharciga lamb. 23 ee 16ka Juunyo 1979 kuna saabsan Aftida Dastuurka Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya;

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Madaxweynaha J. D. S. lamb. 25 ee 20ka Maajo 1979, laguna xaddiday maalinta Aftididda;

**MARKUU TIXGELIYEY:** In ay lagama maarmaan tahay in dib loo dhigo taariikhda Aftida si loo siiyo Dadweynaha Soomaaliyeed fursad ay si buuxda isugu diyaariyaan guda-shada waajibkaas Ummadeed, isla markaana loogu beego taariikhda Aftida xilli ka habboon 16ka Agoosto 1979 oo kafaala qaadaya ka qaybgelid cod dhiibasho aad u ballaaran;

**MARKUU DHEGEEYSTAY** Talada Guddiga Qaranka ee Aftida;

**WUXUU XEERAYAA**

**Qod. 1aad**

1. Taariikhda Aftida Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo horey loogu xaddiday 16ka Agoosto 1979, dib ayaa loo dhigay, waxaana la qaadayaa 25ka Agoosto 1979, inta u dhexeysa 6da aroornimo ilaa 6da fiidnimo.
2. Hase ahaatee haddii loo baahdo, codbixinta waxaa la gaarsiin karaa ilaa iyo 10ka fiidnimo. Si kastaba ha ahaatee inta codbixiyayaa taagan yihiin goobta codbixinta horteeda hawlaha codbixinta lama xiro karo.

**Qod. 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J. D. S.  
Muqdisho 1 Agoosto 1979

**JAALLE MAXAMED SIYAAD BARRE  
MADAXWEYNAHA J. D. S.**